

## Codsashada

# Ka qaybgalayaasha Bulshada: Kooxda La-talinta Cusub



### Waa maxay kooxda cusub?

Maamulka Caafimaadka Oregon waxa ay raadisaa xubnaha bulshada si ay ugu biiraan koox cusub oo gobolka oo dhan ah oo la yiraahdo Guddiga La-talinta Qoondaynta Kheyraadka Oregon.



### Maxaa kooxdan loogu baahan yahay?

Marka dad badani u baahdaan daryeel caafimaad hal mar waxaa laga yaabaa inaysan jirin sariiro isbitaal oo ku filan, sahay ama shaqaale qof walba daryeela. Tani waxay dhici kartaa marka ay jiraan xaalado degdeg ah sida aafo ama masiibo dabiici ah. Kooxdani waxay ku talin doontaa habab ay cisbitaaladu u daryeeli karaan bukaanada ku jira xaaladahan degdega ah.



### Taladaada ayaa loo baahan yahy!

Waxaan rabnaa inaan barano waxa xubnaha bulshadu ay ka qabaan cidda ay tahay inay helaan daryeel marka isbitaaladu ay buuxaan ama aysan jirin sahay ku filan qof walba. Waxaan raadineynaa khibrado iyo aqoon kala duwan. Talooiyinka xubnaha bulshada ama kooxaha la kulmay takoor ku salaysan isir, qowmiyad, luqad, naafo, da', lab iyo dhedig, aqoonsiga lab iyo dhedig, nooca galmoodka, dabaqadda bulshada ama duruufaha kale ee bulsho ahaan go'aamiyay waa muhiim.



### Maxay samayn doonaan kooxdan

Kooxdu waxay dib u eegis ku samayn doontaa sida go'aamada looga gaadho Oregon iyo gobolada kale marka ay jiraan xaalado degdeg ah. Xubin kastaa wuxuu heli doonaa fursad uu ku wadaago fikradahooda iyo sheekadooda. Kooxdu waxay abuurii doontaa talooiyinka ku salaysan sinnaanta caafimaadka ee ku saabsan sida loo sameeyo go'aannada inta lagu jiro yaraanta daryeelka caafimaadka mustaqbalka. Kooxdu waxay ku kulmi doontaa onlayn iyagoo isticmaalaya Zoom qiyaastii bishii hal mar sannadkii.



### Taageero side ahaan heli karaa

- Shaqaaluhu waxay kaa caawin karaan inaad ku biirto shirarka onlaynka ah.
- Kulamadu waxaa joogi doona turjubaano iyo qoraalo la turjumay oo loogu talagalay xubnaha isticmaala luqadaha aan Ingiriisiga ahayn.
- Waxaan siin karnaa taageero macquul ah xubnaha naafada ah.
- Waxaan lacag kugu siin karnaa wakhtigaaga haddii shaqadaadu ku siin weydo lacag aad uga qaybgasho shirarka.
- Kulamada ayaa noqon doona doodo adag. Kooxda taageerada shucuureed ayaa diyaar u ah inay taageeraan kooxda.



### Sideen u codsadaa

Waxaad onlayn ahaan ugu codsan kartaa barta

<https://www.oregon.gov/oha/Pages/Resource-Allocation-Advisory-Committee.aspx>.

Codsiyada ayaa lagu heli karaa luuqado badan. **Codsiyada ayaa ku eg Jimcaha, Febraayo 18, 2022.**

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan guddigaan ama codsigaan, fadlan kala xiriir

[OHA.resourceallocation@dhsaha.state.or.us](mailto:OHA.resourceallocation@dhsaha.state.or.us)

Fadlan kala xiriir Kristen Darmody barta [Kristen.c.darmody@dhsaha.state.or.us](mailto:Kristen.c.darmody@dhsaha.state.or.us) or 971-888-3358

(cod/ama qoraal) si aad u codsato qoraallo aad fahmi karto. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adg yahay.